Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya

Warbixin uu Ergeyga ka horjeediyey Golaha Ammaanka ee ku Saabsaneyd Soomaaliya

24-ka Janaayo 2018

Mudane Madaxwayne,

Waxaa hadda laga joogaa ku dhawaad hal sano markii ay Soomaaliya si nabad ah uga dhacday doorashadii Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Maxamed 'Farmaajo'.

Si la mid ah dawlado badan oo cusub, wuxuu soo maray qalooca waxbarashada sare. Billowgii hore, dowladu waxay dejisay ajande qaran oo la bogaadiyay oo isugu jira dib-u-habayn maaliyadeed, shaqo abuur, siyaasad loo dhan yahay, xallinta khilaafaadka iyo dib-u-habaynta laamaha amniga. Waxa diiradda la saarayaa hawsha muhiimka ah ee diyaarinta qorshaha ku-meelgaarka ee amniga ee xilliga kala guurka.

Si loo dhaqangeliyo ajandayaashan dhinacyo badan leh, dowladda federaalka ayaa wajahaysa caqabado badan oo waaweyn. Mid waa abaabulka awood farsamo iyo mid maaliyadeed oo ku filan. Mid kale waa hubinta habab isku xiran oo isku duuwan oo ay fuliyaan hawlwadeenada qaranka iyo kuwa caalamiga ahba. Midda saddexaad waa in lagu guulaysto maamulida deegaannada awoodda leh ee u baahan in la garab istaago. Kuwaas waxaa ka mid ah dawladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, xldhibaanada baarlamaanka, hoggaamiyayaasha qabiilka, ganacsiga gaarka ah iyo saaxiibada caalamiga ah.

Mudane Guddoomiye, waa arrin dhiiragellin leh, in khilaafkii u dhexeeyay dawladda Federaalka iyo maamul-goboleedyada dalka daba-yaaqadii sannadkii hore ee joogtada ahaa, ayaa hadda xaalka noqday mid deggan. Nooca iyo qaab dhismeedka nidaamka federaalka Soomaaliya ayaa ah mid weli dood adag ka taagan tahay, balse ballan qaadka cusub ee dowladda Federaalka iyo dowlad goboleedyada xubnaha ka ah ee ku aaddan in la iska kaashado baahiyaha Soomaaliya, waa lama huraan si loo gaaro horumar dhinac walba ah.

Sidoo kale waxa dhiirigelinaya xiriirka u dhexeeya dawladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay oo soo hagaagaya, waxaana daliil u ah ansixinta sharciga isgaarsiinta, oo ah tallaabo muhiim ah oo lagu maamulayo dhaqaalaha, iyo kororka kalsoonida ganacsatada iyo dakhliga gudaha.

Bishii Disembar, IMF waxay ku ammaantay maamullada Soomaaliya horumarka ay ka sameeyeen dib-u-habaynta siyaasadda iyo sida wanaagsan ee ay u dhammaystireen barnaamijkii ugu horreeyay ee la-socodka shaqaalaha ee dalka tan iyo dhammaadkii dagaalladii sokeeye. Tani

waxay dalka u horseedaysaa waddo horseeda labadaba deyn cafinta, kordhinta deynta iyo maalgashiga dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyo lacag badan oo adeegyada aasaasiga ah iyo kaabayaasha aasaasiga ah.

Xiriirka Soomaaliya iyo saaxiibada caalamka ayaa weli ah mid xooggan, waxa uu si cad uga muuqday shirkii Amniga iyo Madashii Iskaashiga ee Muqdisho lagu qabtay horraantii Disembar, dowladduna waxay aaminsan tahay in ay u baahan tahay oo ay u qalanto taageero dhaqaale oo weyn si ay u hirgeliso ajandaheeda dib u habeynta, xitaa haddii tani ay ku lug leedahay khataro muuqda oo soo wajahda deeq bixiyayaasha.

Balse siyaasadda Soomaaliya ayaa weli ah mid qasan. Bishii Disembar, waxaa magaalada Muqdisho si weyn looga dareemay xiisad ka dhalatay xarig gacan ka hadal ah oo ay geysatay Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugida Qaranka oo loo geystay nin caan ah. Siyaasi Mucaarad ah iyo Weerarkii lagu qaaday guriga xildhibaan caan ah. Bedelkii dhawaan lagu sameeyay Duqa magaalada ayaa sidoo kale abuuray xiisad siyaasadeed.

Dhacdooyinkan ayaa iftiimiyay dhibaatooyinka aasaasiga ah ee u baahan in wax laga qabto, sida xeerarka qabyada ah iyo mabaadi'da lagu maamulayo hab-dhaqanka siyaasadda, oo ay ku jiraan hababka xil ka qaadista; doorarka iyo khadadka la xisaabtanka ee laamaha badan ee amniga; iyo sii socoshada dhaqanka musuq-maasuqa iyo lacagaha aan la ogaan karin ee yaala suuqa siyaasadda.

Musuqmaasuqu waa aafo, wax u dhimaya dadaallada dib u habeynta, xaddidaya kalsoonida iyo aaminaadda ay Soomaalidu ku qabaan madaxdooda iyo hay'adahooda. Saamaynta ay leedahay ayaa laga arki karaa dhammaan qaybaha nolosha bulshada laga bilaabo ganacsiga, siyaasadda, caddaaladda, amniga, ku waxyeeleynta bulshada gacmaha xagjirka ah. Dawladdu waxay ku dhawaaqday inay ka go'an tahay inay dejiso qorshayaal wax looga qabanayo musuqmaasuqa sannadka soo socda.

Dhanka kale, dhammaan madaxda Soomaaliyeed waxaa looga baahan yahay inay ixtiraamaan sareynta sharciga oo ay ka hortagaan xadgudubyada loo adeegsado siyaasiyiinta ka soo horjeeda. Haddii kale khatartu waxay tahay in horumarka badan ee wanaagsan ee socda uu mugdi geli doono, awoodda dawladda ku fulin lahayd ajandaheeda ballaaran iyo horumarinta nolosha dadweynaha ayaa wiiqmi doonta.

Mudane Madaxwayne,

Culeyska caqabadaha dalka ka jira waa kuwo aad u adag. Saboolnimada daba-dheeraatay iyo baahiyaha bini'aadannimo ee joogtada ah ayaa mugdi xun geliyay Soomaaliya. Khatarta macaluusha ayaa weli jirta ka dib afar xilli roobaad oo xiriir ah oo baaqday. Qorshaha Jawaabcelinta Bani'aadamnimada ee 2018 wuxuu ku dalbadey $1.6 bilyan.

Iyadoo macluusha la hortagey 2017 waxaa mahaddaa iska leh hoggaanka qaranka, hawlaha bini'aadannimo ee wadajirka ah iyo heerarka taariikhiga ah ee taageerada deeq bixiyayaasha,

baahida sugnaanta cunada ayaa ku dhow laba jibaar celceliska shanta sano, waxaana lagu qiyaasay 6.2 milyan oo qof ay u baahan yihiin gargaar bini'aadannimo.

Nafaqo-darrada ayaa waxay meelo badan gaartay xaalad degdeg ah waxaana la filayaa inay sare u kacdo. Abaaraha iyo colaadaha ayaa in ka badan 2 milyan oo qof ku barakiciyay gudaha dalka, ku dhowaad hal milyan oo ka mid ah dadkaasi, oo ay ku jiraan carruur badan iyo in ka badan 80,000 oo haween uur leh, ayaa barakacay 12-kii bilood ee la soo dhaafay.

Marka la eego sida ay abaaruhu ugu soo noqnoqdeen Soomaaliya, waxaa lama huraan ah in wax laga qabto sababaha asalka u ah jilicsanaanta Soomaaliya iyo in la dhiso u adkaysiga khataraha. Tan waxaa loo baahan yahay si looga hortago qulqulka qaxootiga iyo barakaca kale. Gargaarka bini'aadannimada waa in lagu kabaa maalgelin shaqo abuur guud lagu sameynaayo iyo kaabayaasha aasaasiga ah.

Taasi waxaa aas-aas u ah Qiimeynta Baahida ka Dhalatey Saameynta Abaaraha iyo helidda Hay'ad ka shaqeysa dib usoo kabashada iyo u adkeysiga khataraha oo ay abuurto Dowladda Federaalka iyadoo taageero ka heleysa Qaramada Midoobey, Bangiga Adduunka iyo Midowga Yurub. Taageero joogto ah ayaa loo baahan doonaa si Soomaaliya looga caawiyo in ay ka adkaato xasaradaha soo noqnoqda ee sababa dhibaatooyin badan oo wiiqaya nabad-dhisidda iyo geeddi-socodka dowlad-dhisidda.

Udub dhexaadka geeddi-socodkaas waa in la helo heshiis siyaasadeed oo ku saabsan sida awoodda loo isticmaalo, loo wadaago, layskula xisaabtamo. Tani waxay u baahan tahay horumar laga gaaro saddex arrimood oo muhiim ah: dib u eegista Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah; u diyaar garowga doorashada 2020/21; iyo xallinta khilaafaadka iyo dib-u-heshiisiinta.

Shirweynaha Qaran Dastuurka ee loo asteeyay March/Abriil ayaa la filayaa in lagu daah-furo wajiga xiga ee geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka, iyadoo diiradda lagu saarayo kheyraadka iyo awood-qeybsiga Dowladda Federaalka iyo Maamul-goboleedyada Dalka, maqaamka Muqdisho iyo is-waafajinta Dastuurka Federaalka iyo dastuurrada Dowlad Goboleedyada Soomaaliya.

Bishii Disembar 2017, Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ayaa daahfurey qorshahiisa istaraatiijiyadeed si loo hirgeliyo doorasho heer caalami ah. Tani waxay u baahan tahay taageero siyaasadeed oo joogto ah iyo maalgelinta deeq-bixiyayaasha. Diiwaangelinta xisbiyada siyaasadda waxay gacan ka geysan doontaa xasilinta xasaradda siyaasadda. Ilaa hadda waxa la diiwaan galiyay 7 urur siyaasadeed oo mid ka mid ah ay hogaaminayso qof dumar ah. Sidoo kale diwaangelinta xisbiyada waa tallaabo aasaasi ah oo horey loo qaaday si loo qabto doorashooyin heer caalami ah.

Mudnaanta koowaad waxaa ka mid ah diyaarinta iyo ansixinta sharciga doorashada oo uu meel-mariyo baarlamaanka, heshiis laga gaaro nidaamka matalaadda, howlaha ku saabsan diiwaangelinta codbixiyayaasha, iyo tayaynta joogtada ah iyo horumarinta Guddigga Doorashooyinka Qaranka iyo guddiyadda heer maamul goboleed.

Dhanka xallinta khilaafaadka iyo dib-u-heshiisiinta, dowladda federaalka waxay qorsheyneysaa inay daahfurto istaraatiijiyad qaran bilaha soo socda, iyadoo la ogyahay noocyada badan ee khilaafaadka iyo cabashooyinka badan ee dalka ka jira.

Dhanka kale, siyaasadda dalka waxaa laga gaaray xoogaa horumar ah. Tan iyo sanadkii 2015-kii, Maamulka Galmudug waxaa ku kala qeybsanaa hoggaanka Maamulkaas, iyadoo Ahlu Sunna Wal Jameeca taageertey madaxda maamulka ee u barakacay Cadaado. Madaxweyne Farmaajo ayaa 18-kii bishii Janaayo magaalada Dhuusamareeb waxa uu kaga qeyb-galay munaasabad lagu shaacinayay heshiiska iyo isku dhafka labada koox, iyo isla meelmarinta arrimaha dastuurka iyo qaab-dhismeedka hay'adaha amniga iyo in maamulka dowlad goboleedka dib loogu celiyo Dhuusamareeb, wadahadaladaas oo lagu gaaray heshiis siyaasadeed.

Tani waxay faa'iido u tahay dadaallada lagu xallinayo khilaafaadka kale oo ay ka mid tahay xiisadda Gaalkacyo. Dhawr ayaa weli ku sii qulqulaya, kuwaas oo abuuraya xaalad amni darro lagana mashquulayo khatarta weyn ee Al Shabaab.

Waxaa jirta khatar aad u weyn oo ah in muranada soo jireenka ah ee u dhexeeya Puntland iyo Somaliland, gaar ahaan is-hor-fadhiga hubaysan ee Gobolka Sool, ay ka dhalan karaan rabshado maalmaha soo socda, kuwaas oo laga dhaxli karo cawaaqib xumo. Tani waxay ku soo beegantay wax yar uun ka dib markii ay soo idlaatey doorashadii madaxweynaha iyadoo si habsami leh oo nabdoon xilka madaxweynaha "Somaliland" lagu kala wareegey dabayaaqadii sannadkii hore.

Anigoo taageero ka helaya saaxiibada Soomaaliya ee beesha caalamiga oo ay ku jiraan qaar badan oo fadhiya Golahan, waxaan ku booriyay madaxda Puntland iyo "Somaliland" inay ku dhawaaqaan joojinta dagaalka, kala qaadista ciidamadooda, soo celinta xaaladdii hore, iyo furidda waddooyinka wadahadalka.

Mudane Madaxwayne,

Al Shabaab ayaa weli ah khatar xooggan, inkastoo ama laga yaabo inay ku socoto lugta dambe taasoo ka dhalatay cadaadis dhaqaale, hawlgallada ka hortagga argagixisada iyo weerarada cirka.

Oktoobar 14-keedii, Muqdisho waxaa ka dhacay weerarkii ugu dhimashada badnaa abid ee loo adeegsadey walxaha qarxa, iyadoo dhimashada lagu qiyaasay 512 qof, kuwaas dhammaan u badnaayeen dad rayid ah.

10kii Diisambar, UNSOM waxay bilawday warbixinteedii ugu horaysay ee Badbaadinta Rayidka taas oo la arruurinayey muddo dhan 18 bilood oo ku sinneyd bishii Oktoobar. Waxay diiwaangelisay wadar ahaan 2,078 qof oo rayid ah oo la dilay iyo 2,507 lagu dhaawacay, kuwaas oo intooda badan loo aaneynayo Al-Shabaab.

Shan maalmood ka hor, ciidamada gaarka ah ee XDS 'DANAB' ayaa 36 carruur ah ka soo badbaadiyay xero ay Al Shabaab ku tababari jireen, kuwaas oo intooda badan markii hore si qasab ah lagu askareeyay.

In laga adkaado Al Shabaab waxa ay u baahan tahay qaab ciidan iyo mid siyaasadeed labadaba, adeegsiga ul iyo karooto labadaba, iyo sidoo kale dadaal joogto ah oo wax looga qabanayo cilladaha keenaya in xagjiriinta lagu kalsoonaado. Waxaa ka mid ah musuqmaasuqa, waxbarasho la'aanta iyo fursadaha shaqo ee dhalinyarada oo aad u yar, cadaaladda hay'adaha garsoorka dalka oo aad u liidata iyo toosinta qaranka iyo cabashooyin ka dhashay khilaafaadka aan weli la xalin.

AMISOM ayaa weli aasaas u ah amniga dalka, waxaana ay ku ammaananyihiin in ay abuureen fursad ogolaanaysa horumarka siyaasadeed ee Soomaaliya tobankii sano ee la soo dhaafay. Waxaan bogaadinayaa geesinimada iyo naf-hurnimada ciidamadooda, waxaana u mahadcelinayaa wadamada ciidan iyo boolis ku dheeqay howl-galka si ay u badbaadiyaan Soomaaliya.

AMISOM ma sii joogi karto markasta. 2018 waxaa loo baahanyahay dadaal adag oo ay sameeyaan madaxda Soomaaliya, Midowga Afrika iyo saaxiibada beesha caalamka si loo dhiso ogolaansho siyaasadeed iyo karti hawleed ee hay'adaha amniga Soomaaliya.

Tani waa in ay AMISOM u suuragasho in ay si tartiib tartiib ah mas'uuliyadda ugu wareejiso ciidamada Soomaaliya, iyo in ay awoodda dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada gaarsiiso in ay si kali ah u howl-gali karaan, sida ku cad heshiisyada dhismaha Amniga Qaranka. Xaaladda hadda jirta ee mas'uuliyadaha amniga ay kala qaybsan tahay, inta badan si gaar ah loo xukumo oo aan lala xisaabtamin ayaa ah mid khatar ah oo aan la sii wadi karin.

Si taas loo gaaro, 4-tii Diseembar, Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada ayaa ku heshiiyey in rubuci hore ee sanadkan la dejiyo qorshaha xilliga kala guurka ah, iyadoo si dhow loola shaqeynayo saaxiibada caalamiga ah, oo ay ugu muhiimsan yihiin Midowga Afrika, Dowladaha Ciidanka iyo Booliska ku dheeqay howl-galka iyo Maal-gashadayaalka caalamiga ah ee waaweyn ee ku hawlan amniga Soomaaliya ee uu ka mid yahay Midowga Yurub.

Waxay ku heshiiyeen inay abuuraan qorshe shuruudo ku salaysan oo leh ujeedooyin cad cad iyo taariikhaha la fulinaayo. Tani waxay gundhig u noqon doontaa habka loo dhan yahay ee loo wajaho amniga si loo xaqiijiyo in qorshayntu aanay diirada saarin oo kaliya xil wareejinta ciidamada militariga balse sidoo kale waxaa diirada lagu saari doonaa ciidamada booliska, hay'adaha sharciga iyo xoojinta nidaamka aasaasiga ah ee dowladaha hoose, kuwaas oo dhamaantood lama huraan u ah sii joogteynta guulaha amniga horey loo gaarey iyo xoojinta kalsoonida dowladnimo.

Meesha laga bilaabayo qorshahani maaha mid ku haboon. Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa qiimeyn ku sameysay sida Ciidanka Xoogga Dalka iyo Booliska Soomaaliyeed ugu diyaarsanyihiin Howlgal, iyadoo si cad loo fahamsan yahay awooddooda. Kuwani waxay daaha ka rogeen cillado badan iyo caqabada weyn ee hortaal sidii qaab-dhismeedka Amniga Qaranka loo waafajin lahaa xaqiiqada ka jirta goobaha howl-gallada.

Sidaas darteed sii Joogitaanka AMISOM waa lama huraan. Ciidamada AMISOM oo si degdeg ah loo dhimo waxay hadiyad u noqon doontaa Al Shabaab, waxayna halis u tahay inay wiiqaan guulihii la gaaray, oo ay ku baxeen naf iyo maal aad u farabadan tobankii sano ee la soo dhaafay.

Qaramada Midoobay waxay sii wadi doontaa inay si dhow ula shaqeyso Midowga Afrika iyo maalgashadayaasha muhiimka ah ee amniga si ay u sahamiyaan hababka waara oo la saadaalin

karo ee maalgelinta AMISOM iyo in AMISOM lagu taageero in ay si hufan u gudato waajibaadkeeda.

Tallaabo horumar leh baa la qaadey. 2,400 oo askari oo ka tirsan ciidamada difaaca Puntland ayaa lagu biiriyay ciidamada xoogga dalka Soomaaliyeed, taas oo tusaale u ah suurtagalnimada ah in isku dhaf laga maamul-goboleedyada kale ee dalka.

Waxaa lagu heshiiyey in maamul-goboleed kasta loo qoondeeyo tiro boolis ah, Muqdisho iyo dowladda Federaalka. Dawlad Goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka waxa uu sameeyay Qorshe Boolis heer Dowlad Goboleed.

Habka Cadaaladda iyo Asluubta ee la is waafajiyay ayaa waxaa ansixiyay Golaha Amniga Qaranka kaas oo bud dhig u aasaaska dhismaha nidaam cadaaladeed oo madax-banaan oo dhexdhexaad ah. Qorshe hawleed ayaa la sameeyay si loo dhaqan geliyo Istaraatiijiyadda Qaranka ee Ka-hortagga iyo Ladagaalanka Xag-jirnimada Hubeysan.

Xaaladda xuquuqul insaanka ayaa weli ah mid walaac weyn leh. Hirgelinta sharciga heerkiisa aad buu u hooseeyaa waxaana maqan awoodaha iyo hababka lagu ilaaliyo laguna horumariyo xuquuqda aasaasiga ah. Xoog ku barakicinta, xadgudubka galmada iyo caburinta xoriyada hadalka ayaa ka mid ah tilmaamayaal badan, iyadoo bulshooyinka la takooro iyo kuwa laga tirada badan yahay ay si gaar ah u nugul yihiin.

Qaramada Midoobay waxay taageertaa dawladda Faderaalka si ay u xoojiso qaab-dhismeedka, hay'adaha iyo tallaabooyinka lagu ilaalinayo xuquuqul insaanka, si wax looga qabto isla xisaabtan la'aanta iyo hagaajinta ilaalinta haweenka iyo carruurta, iyo in la qaado tallaabo lagu joojinayo ku lug lahaanshaha carruurta ee dagaalada hubeysan. Dhismaha Golaha Qaranka ee Xuquuqul Insaanka ayaa ah tallaabo wanaagsan oo hore loo qaaday.

Mudane Madaxwayne,

Soomaaliya waxay ku tallaabsaneysaa horumar la hubo, inkastoo khatartu ay tahay mid dhab ah. Waxaa nasiib wanaag ah in la helo dowlad ay ka go’an tahay dib u habeynta, xallinta khilaafaadka iyo daboolidda baahiyaha ka taagan arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo amniga ee haysata shacabka.

Horumarka sii socda kuma xirna oo kaliya rabitaan siyaasadeed iyo xirfad adag ee Dawladda Federaalka, laakiin sidoo kale wada shaqaynta iyo iskaashiga Maamul-goboleedyada dalka, baarlamaanka, odayaasha beelaha, ganacsatada iyo saaxiibada caalamiga ah. Marka dhammaan dhinacyadaas iskaashadaan, waxaa la gaari karaa horumar ballaaran.

Waxaan aad ugu dhiirigelinayaa hoggaamiyayaasha Soomaaliyeed inay u midoobaan wax ka qabashada arrimahan mudnaanta leh iyo in 2018-ka uu noqdo sanad howl fulin ah. Oggolow inaan fursadan ka faa'iidaysto si aan ugu dhiirigaliyo saaxiibada caalamiga ah inay sii wadaan deeqsinimadooda maaliyadeed, taageeradooda xoojinta awoodaha farsamada iyo in uu gargaarkooda noqdo mid hufan oo isku duwan.

Mahadsanid, Mudane Madaxwayne.